# Golaha Wakiilada JSL

## Waaxda Hadal Qoraalka

**Opened: - 10:15 AM** **Hansard No.21/1** **Kal-fadhi 21aad fadhiigsa 2aad**

***22/04/2013***

***Dooda Ajendaha Kal-fadhiga 21aad oo ay ka qeyb-qaaten 12 mudane socoteyna 1 maalin oo kaliya***

**Mudanayaasha Dooda ka qeybqaatey**

1. **Md. C/karim Aw Cali Shabeel:-** Inkasta oo anigu fikir ahaan aan jeclaa in intan laga soo balaadhiyo oo aan jeclaan lahaa in lagu xiso qodobka xaalada wadanku marayo si loo qiimeyo, Waxaan si kooban u soo jeedinayaa:-
   - In Xeerka Maamuuska Madaxweynaha iyo M/weyne ku-xigeenka oo hore looga doodey Guddina loo saaray in Magaca Xeerka laga dhigo **Xeerka Maamuska Golayaasha Qaranka**, Gudidii loo saareyna waxa laga sugayaa iney keenan wixii ay ka soo badaleen, intaas ayaan ku soo koobayaa.

2. **Md. Xasan Cawaale Caynaan:-** waxaan anigu ku soo daryaa:-
   - Waxaan dooda Ajedihii Kalf-fadhigii hore ku doodney in Lagu soo daro **Xeerka Caasimaada**, Markii Danbena waxaanu ku keenay Motion, ilaa hada wax ku jira oo lagu soo daray ma jirto, ma garanayo wuxuu shir-gudoonku ku diidan yahay in Xeerka Caasimada lag soo daro.
   - Golihii hore wakhtigiisii wuu dhamaadey oo wakhti cusub baa la kordhiyey, markaa shir-gudoonkana wakhtigoodii wuu dhamaadey, waa in lagu soo daraa Ajendaha doorashada Shir-gudoon cusub, waadmahadsantihiin.

3. **Md. Maxamud Jamac Cilmi ( Dable):-** Shir-gudoonka iyo Mudanayasha waan idin salaamay, qoladii wax dhageysan jirtey way joogtaye waxaan jeclaa in mar si gaara aynu fadhi xidhan u yeelano, Gudoomiye intan ajendaha lagalin warbixino ayaa la dhageysan jirey adigu shirbad ka qeybgashay anaguna teel teel ban ku maqalney, Gudidda joogtaduna warbixinteedii intii goluhu fasaxa ku maqnaa waa in la dhageystaa.

   Ajendahu ma shiilna, mana ah mid ka turjumaya waaqaca jira ee iminka taagan, waxaan ku soo darayaa dhowr qodob:-

- Waa in ajendaha lagu daraa halkan waxaynu Madaxweynaha ugu ansixinay ka qaybgalka shirarka, **waa in markaa Golahani resolution lagu taageerayo shirkii turkiga** wixii ka soo baxay oo Goluhu ku bogaadiyaa Xukuumada guushii shirkaa ka soo baxdey, iyo talaabadii uu madaxweynuhu qaaday oo aynu ku bogaadino Barlamaan ahaan.
- **Heshiiyada** Goluhu wuxuu xaq u leeyahay in ansixiyo oo ogolaado wixii imanaya ee dalka wax ka qabanaya iyo wixii kheyrada ee labaadhayo oo Goluhu sharci ka soo saaro marka hore.
- **Xaalada dhaqaalaha ee dalku marayo** waa in lagu daraa, waxaynu ku soconaa halkii mudaharaadyadii ka dhacay yurub, waxaa jirta dhibaato badan Sarifkii lacagtu wuu kacay oo 8 iyo 9 buu sii socdaa, markaa arrimahasna waa in Goluhu u yeedho Wasaarada maaliyada iyo baanka oo gudiddan dhaqaalaha 4 oo u yeedheyso maahee Golaha ay horyimaadaan.
- Kalmada Duuduub waa in la joojiyaa oo wax Xeer-hoosaadka iyo dastuurka ku qoran maahee waa inaan Golaha dib looga odhan waxaa duuduub aan ku ansixino.
- Halka Goluhu wax ka qaban la'yahay waa Guddiyada oo noqdey kuwo fadhiida oo soo taagan waxbana aan qabaneyn, Markaa waa in Gudiyada Golaha la isku badalo oo dib u habeyn lagu soo sameyo.

**Gudoomiyaha:-** Mudane Waxaanu Warbixinta Shirgudoonka aan idin siin doonaa marka Ajendaha la ansixiyo siday ahaan jirtey.

4. **Md. Baar Siciid Faarax:-** marka hore waad salaamantihiin**,** anigu laba qodob ayaan u dayaa:-
    - **Xaalada Dhaqaale ee dalka ka jirta** oo sarifkii lacagtu aad u kordhey 700 bay sii cagacageynaysaa, dhibaato badan bulshadii ku haysa waa ajendaha lagu soo daraaa oo wax laga yidhaahdaa, markaa waa in lagu soo daraa ajendaha in loo yeedho cidii hawshaa qaabilsanayd oo Golaha horyimadaan.
    - **Heshiisyada Shidaalka** waa in lagu soo daro in Golaha la horkeeno

5. **Md. Jamac Xasan Aadan:-** anigu dhowr arrimood oo aan qodobeeyay baan ku soo darayaa:-

    - Heshiisyadii dawladii hore iyo tan manta ay galeen sida heshiiskan shidaalka waa Golaha La horkeenaa oo lagu daraa Ajendaha.

- **Xeerka Kala-xadeynta Gobolada iyo Degmoyinka** waa in lagu soo daraa oo isagaa kan caasimada ka horeye marka hore isaga la ansixiyaa:-
- Xeerkan Maamuuska Madaxweynaha waa in laga dhigaa **Xeerka Maamuuska Golayaasha Qaranka** oo lagu soo daraa Mudanayasha labada Gole, waayo Mudane dhan oo geeriyoodey ayeynu wixii lagu aasayay baaho ugu ururiyaa.
- Waxaan ku raacsanahay dable in Gudiyada labadalo madaama wakhtigii la kordhiyey, xisbiyadiina isbadaleen, Gudidda dhaqaalaha oo kaliya waxaa ku jira 8 xubnood oo isku xisbiya.

6. **Md. Ibrahim Mahdi Buubaa:-** Ajendahani maaha mid ka turjumaya Xaqiiqda dhabta ah, waxaa ka muuqata inaanu Golahani shaqeynan, markaa waa in Gabigiisaba la laalo ama lagu badalo qodobo muhiima oo baahi badan loo qabo sida:-

- Qiimeynta Xaalada Nabadgalyo ee dalka waa in lagu soo dara, tan iyo intii doorashooyinkii deegaanku dalka ka dhaceen ay dhibaato badan abuureen sida Mudaharaadadii, sida boolisku ula dhaqman mudaharaadayaasha
- **Heshiisyada:-** dawladii hore waxaynu ku haysan jirney inay heshiisyada ay gasho in horkeento markaa Heshiiska shidaalka iyo heshiisyada kale ee lagalo Waa in Golaha la horkeeno, sida sharcigu dhigayo in heshiis kasta oo keenaya culeys dhaqaale
- **Heshiiskii Turkiga waxaa Golaha la horkeenay 7 qodob** oo Golaha loo qeybiyay waxaan soo jeednayaa in Qodob Qodob looga doodo 7 Qodob ee ka soo baxay shirkaas, waxaa kaloo jira in 90 cisho gudohood la shirkale la isugu noqonayo turkiga shirkaa iyo waxa lala tagayo waa in Golahani sii jaangooyaa.
- **In loo yeedho Komishanka doorashooyinka ha loo yeedho,** waxaynu ognahay in doorashii u dhiciweyday diiwangalinitii aynu laalnay Doorashadii Golaha deegaanka, ujeedada loo laalay ahay khaladaadkii ka muuqday sharciguna uu dhigayay inaan doorasho danbe Diiwangalin la'aan aan lagu galin, Markaa ha loo yeedho si ay uga jawaabaan hawshii Qaranka halkay marinayaan iyo waxybaababaha hortaagan inay sameeyan diiwangalintaas.

- Ajendaha waxaan lagu soo qoraa halka ugu danbeysa iyo wixii soo kordha, waxaa soo kordhayaa ma xukumada keeneysa iyana waa in laga saaro oo wixii xukuumadu keenayso marka hore keento Golaha

7. **Md. Axmed Cabdi Nuur (Kijandhe):-** runtii ajenduhu wuu fiicanyahay waxyaabo muhiima ayaa ku jira, wxuu u baahanyahay in la yar qor qoro, lkn anigu waxaan is weydiiyaa maxay wax uga badali wayaan Xeerarka aan soo-saarnaa nolosha bulshada oo ay u noqon waayaan kuwo baahidii loo sameyey wax ka badala, anigu waxaan odhan lahaa ha lagu soo daro

   - Xaaladaha Wadanka ka jira qiimeynteeda.

8. **Md. Xuseen Maxamed Cige**:- Shirgudoonka iyo Mudanayasha wan idin salaamaya, anigu waxbadan ka hadli mayo hal qodob ayaan ku soo darayaa oo ah:-

   - **Dhalinyaradii gaar ahaan jaamacada ka soo baxay**, dhibaata haysata Maalin walba way tahriibayaan oo waxay noqotey dhibaato sii kordheysa, waxaana jira dad ka shaqeya tahriibistan halkan ilaa suudaan oo lacagta u kala qaada, arrintaasi waa arrin culus, Markaa waxaan soo jeedinayaa in arrintas ajendaha lagu soo daro.

9. **Md. Axmed Maxamed Diiriye (Nac Nac):-** Marka hore Gudoomiye iyo Mudanayaal waad salaamantihiin, sharci ayaynu sameysanay hadaynaan ku dhaqmina waa dhibaato, Xildhibaanka muqdisho tagey oo ka soo noqdey ee aan waxba laga qaban, maantana jaraa'idka waxa ku soo qorey waa in wax laga qabtaa oo ajendaha aynu ku darsanaa

10. **Md. Ibrahim Jaamac Cali Reyte:-** Xeerarka ku jira ajendaha waa muhiim lkn waxaa ka maqan wadciga siyaasiga ah wax ka turjumaya, sida qiimeynta xaalada Dalka, tan kale wakhti cusub ayaynu galney waa xil la isasaarna, Shidaal iyo macdan qodis baa wadanka laga wadaa inana maynaan ansixin xeerarkii waana waajibaadkeena**,** xeerarkaa waa in la dedejiyaa.

11. **Md. Maxamed Faarax Qabile:-** horta golahani manta wuxuu u baahan yahay waxqabad
   - Waxaa golaha ku wajiba in heshiiyada dhaqaale iyo siyaasadeed la horkeeno oo aynu ansixino maarkaa ha lagu daro ajendahah
   - Waa in lagu soo daro Xeer 23 waayo wuxuu curyaamiyay degmoyin badan

12. **Md. Xuseen Ismaciil:-** Shirgudoonka iyo Xubnaha Goluhu aad ban u salaamayaa, dooda xildhibaanadu waxay u badan tahay xilkeena aan gudano, dibadan ka imi sharaf badan inooma taal, mar hadii la kordhiyey 2 sano waxay ila tahay dadki ina soo doortey aynu ugu shaqeyno sida sharcigu awooda inoo siiyey sideeda ugu dhaqaaqno, ajendaha markan eego:-

- .waxaan xildhiban reyte ku raacsanahay in wixii Heshiiyo caalamiga la galay Golaha la horkeeno, waa loo baasgareynayaa laakiin Goluhu waa inuu ogaado wixii macdan iyo shidaal la baadhayo, Xeerkii Macdanta iyo kheyraad waa inaan ansixinaa
- Bangiga islamiga oo dalka ka shaqeysaa, waxay qabanayso sida loo qaybiyay Gobolada iyo deegaanada.
- Xeerka Hawlaha Baananka aan ugu horeysiiyo oo laga dhigo qodobka ugu horeysa, Arrinta xaalada dhaqaalaha dalka waliba sarifkii lacagta oo 8,000 siimaraya sidii wax looga qaban lahaana waa in lag soo daro.

Waxaan ku soo gabagabeynayaa 2 sano ee la inoo kordhiyey inaynu boodhka iska tuno oo waajibkeena gudano.

***<u>Gudoomiyaha:-</u>*** waxaa intaa ku soo gabagabowday Doodii Mudanayaasha ee Ajendaha Kal-fadhiga, Waaxda Hadal Qoraalka ayaa Soo ururin doona dooda Mudanayaasha, Maalinta Bari ah, waxaynu ansixindoonaa Maalinta Sabtida insha'alah oo Bari fasax baynu nahay Arbacada iyo khamiistana Gudiyadaa shaqeynaya, Fadhigu sidaasu inoogu xidhanyahah

**Cawad Cali Maxamed**
**Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada**
-----------------------------------------------

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl**
-----------------------------------------